



Farriintani waxaa iyada oo ah English, Русский, Soomaali, Español, 简体中文, TiếngViệt la soo geliyay <https://go.usa.gov/xtBQC>.

Sibtambar 19, 2022

Ku socota qoysaska leh carruur gaartay da'da dugsiga lagu aado, shaqaalaha daryeelka shakhsiyeed, hay'adaha daryeelka bixiya iyo CDDP-yada

Ka socota: Lilia Teninty, Agaasimaha, Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka

Ujeedada: Shaqaalaha taageerada iyo adeegyada dugsiga

Sanad dugsiyeedkii ayaa bilaabmay iyada oo carruur dheeraad ahina ay si shakhsi ah dugsiga ugu soo laabteen. Fadlan akhri is xasuusintani ku saabsan doorka shaqaalaha daryeelka shakhsiyeed (PSW-yada) iyo xirfadlayaasha taageerada tooska ah (DSP-yada) ee taageera carruurta.

**PSW-yada iyo DSP-yada waxay carruurta iyo dhallinyarada ka caawiyaan baahiyaha ka jira guriga** ka hor iyo ka dib maalin dugsiyeedka. Kuwani waxaa ka mid ah wax cunista, qubeyska, lebisashada iyo hawlaha la midka ah.

**PSW-yada iyo DSP-yadu adeegyo kuma bixin karaan dhulka dugsiga ama basaska dugsiga.** Inta ay ku jiraan saacada shaqada “on the clock,” carruurta uma qaadi karaan kamana soo celin karaan dugsiga.

**PSW-yada iyo DSP-yada ma qaban karaan hawlo waxbarasho, xataa haddii carruurta wax ku baranayso guriga.**

Marka ay jiraan duruufo kooban, ODDS waxaa dhici karta in ay ansixiso wax iska reebid PSW ama DSP u saamaxaysa in ay bixiyaan **daryeel gaar ahaaneed** oo loogu talagalay carruurta iyo dhallinyarada aan dhigan karin dugsiga dadweynaha. Akhri [Siyaasada Farriinta Gudbinaysa 22-081, “Attendant Care During the School Day,”](#) wixii faahfaahin dheeraad ah.

Fadlan ogow: Ma jiraan **wax ka reeban** ka macnuucida shaqaalaha ay dhaqaalihiiisa bixiso ODDS in ay carruurta la aadaan dugsi dadweyne ama mid gaar ah, la raacaan baska dugsigu, ama qabashada hawlo waxbarasho.

Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan xeerarkani iyo siyaasadahani, akhri [xeerarka ODDS ee loogu talagalay Taageerada Noloshada Bulshada](#).

Waad ku mahadsan tahay raacida tilmaamaha iyo xeerarka ODDS. Waxaad yeelataa sanad dugsiyeed wanaagsan.

Si Daacadnimo leh,



Lilia Teninty  
Agaasimaha  
Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka

*Farriintii Agaasimihii hore ee ODDS ayaa laga heli karaa <http://www.oregon.gov/DHS/SENIORS-DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx>*

*Nagala soco Facebook [@oregonDHS.IDD](#) ama twitter [@OregonODDS](#) oo wax ka ogow [website-keena](#) .*

Waxaad heli kartaa dokumentigan oo ku qoran luqaddo kale, far waaweyn, farta dadka indhaha aan qabin wax ku akhriyaan ee braille ama qaabka aad doorbidayso. Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka ee Oregon kala xiriir 503-945-5811. Waan aqbalnaa wicitaanada nooc kasta leh ee adeegyada gudbinta farriimaha ee loogu talagalay Dadka dhagaha la, dhagaha la'-indhaha la', maqalku ku adag yahay ama qaba naafanimada dhanka hadalka. Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan bixiyayaasha adeegyada gudbinta farriimaha booqo [www.oregonrelay.com](http://www.oregonrelay.com) ama [www.fcc.gov/encyclopedia/trs-providers](http://www.fcc.gov/encyclopedia/trs-providers).